**REF: XXG/001/2022** **Date: 02/01/2023**

**Ujeeddo: Wareegto soo gudbin xisaab xirka hay'adaha iyo mashaariicda dowladda ee Sanad Maaliyadeedka ku dhamaaday 31-ka December 2022**

## 1. Hordhac

Sida aad la socotaan sanad maaliyadeedkii 2022 wuxuu ku dhamaaday 31-ka December 2022, sidaas daraateed Xafiiska Xisaabiyaha Guud ee Dowladdu waxa uu soo saaray wareegtadaan ujeedkeedu kor ku xusanyahay laguna farayo dhamaan Wasaaradaha, Hay'adaha iyo Wakaaladaha Dowladda Federaalka Soomaaliya in ay soo gudbiyaan Xisaab xirka Sanad Maaliyadeedka ku dhamaaday 31-ka December 2022.

Xisaabiyaha Guud ee Dowladdu kadib markii uu arkay qodobada 43aad iyo 45aad faqradiisa 2aad ee Sharciga Maamulka Maaliyadda Dowladda ee soo baxay 2019-kii ee faraya masuul kasta ama hay'ad kasta ee maamusha hanti dadweyne in uu soo diyaariyo soona gudbiyo warbixin iyo xisaab xir dhamaystiran dhamaadka sanad maaliyadeed kasta.

Qodobka 44aad faqradiisa 1aad ee isla Sharciga Maamulka Maaliyadda Dowlada waxa uu farayaa Xisaabiyaha Guud ee Dowladu in uu xisaab xirka wasaaradaha, hay'adaha Dowladda u gudbiyo Xafiiska Hanti-dhowraha Guud si uu baaris hantiyeed ugu sameeyo muddo ku siman afar bilood.

Si hadaba loo helo xisaab xir saxan ka hor inta aan loo soo gudbin Xafiisyada Xisaabiyaha Guud iyo Hanti dhowraha Guud waxaa muhiim ah in hay'ad walba raacdo tilmaamaha lagu adkaynayo tayada warbixinada maaliyadeed ee ka soo baxaya hay'adda ee ku lifaaqan qoraalkaan.

## 2. Xiliyada kama danbaysta ah ee warbixinada iyo xeerarka xisaabeedka la raacayo

Shaxda hoose waxaa ku faahfaahsan xiliyada kama danbaysta ah iyo nuuca warbixin ee laga rabo hay'ad iyo mashruuc walba in uu soo gudbiyo dhamaadka sanad maaliyadeedka 2022-ka

| Tirsi | Faahfaahin | Xiliga | Qodobada sharciga ah ee khuseeya (SXMD ama HHG) | masuuliydaad |
|---|---|---|---|---|
| 1 | Warbixin bil le ah – Isticmaalka Miisaaniyadda [Budget utilization report] | 7-da bisha xigta bisha warbixintu khusayso | qodobka 44 (1)(SMM2019) | Agaasimaha Guud ee Hay'adda |
| 2 | Warbixin rubac le ah | 30 maalmood kadib dhamaadka rubaca | Qodobka 44(2) ee (SMM2019) | Agaasimaha Guud ee Hay'adda |
| 3. | Soo gudbinta 1aad ee xisaab xirka SM2022 si loo hubiyo | 28-ka Febraayo 2023 | | Agaasimaha Guud ee Hay'adda |
| | Soo gudbinta ugu danbaysa ee xisaab xirka SM2022 si loogu sii gudbiyo XHGD | 30-ka April 2023 | Qodobka 45ad (2) ee (SMM2019) | Agaasimaha Guud ee Hay'adda |
| 4 | Gudbinta xisaab xirka Guud ee Dowladda ee sanad maaliyadeedka 2022 ee XHGD | 30[ka] April 2023 | qodobka 45aad (1) ee SHMMD | Xisaabiyaha Guud |

## 3. Warbixinada loo soo gudbinayo Xafiiska Xisaabiyaha Guud

Masuul kasta ee hay'adeed ama madaxda mashaariicda waxaa laga doonayaa ka hor inta aysan usoo gudbin warbixin xafiiska Xisaabiyaha Guud in la hubiyo arrimaha soo socda;

i) In warbixintu khusayso mudada la xisaab xirayo (bil/rubac ama sanadle).

ii) In warbixinta loo soo diyariyey si waafaqsan habka uu farayo Xafiiska Xisaabiyaha Guud

iii) In warbixintu leedahay saxiixa iyo ogolaanshaha qofka masuulka ka ah hay'adda ama mashruuca. Sidoo kale warbixinta waa in lagu soo diraa ciwaanka (e-mailka waaxda warbixinada maaliyadeed ka eeg lifaaqa (A) sidoo kale waa in la keena buug daabacan.

## 4. Habka loo diyaarinayo warbixin maaliyadeedka hay'adda

Qodobka 43aad faqradiisa 1aad ee Sharciga Maamulka Maaliyadda Dowladda ee 2019 waxa uu farayaa Xisaabiyaha Guud in uu jideeyo nidaamka loo marayo xisaab xirka hay'adaha dowladda, hadaba sidaas darteed dhamaan warbixinada maaliyadeed ee la soo gudbinayo waxaa laga doonayaa in ay ahaadaan kuwo waafaqsan xeerarka caalamiga ah ee ku xisaabtanka lacagta caddaanka ah ee loo yaqaano cash-basis International Public Sector Accounting Standards [IPSAS] ee ay diyaariso dallada dajinta sharciyada xisaabaadka dowladaha ee "International Public Sector Accounting Standards Board". Sidoo kale si waafaqsan qodobka 11.3.3aad ee buugga Hogatusaha Habraacyda ee loo diyaariyey hab waafaqsan xeerka kor ku xusan lana doonayo in hay'ad walbaahi isticmaasho marka ay diyaarinayso warbixin maaliyadeedka. Hadaba warbixinada la doonayo waxa ay kala yihiin kuwa soo socda;

i) Faalada iyo falanqaynta warbixinta (Discussion and Analysis)

ii) Waajibaadka mas'uuliyiinta hay'adda [Statement of responsibilities]

iii) Muuqalka Dakhliga iyo Kharashka [Statement of cash receipts and payments]

iv) Muuqaalka Hantida iyo Daymaha Maaliyadeed [Statement of financial assets and liabilities];

v) Muuqaalka Qulqulka kaashka [Statement of cash flows];

vi) Isbarbar-dhigga Miisaaniyadda iyo Qoondada Dhabta ah [Statement of budget comparison with actuals];

vii) Xeerarka xisaabeedka loo cuskaday diyaarinta iyo soo gudbinta warbixin maaliyadeedka;

viii) Faahfaahin dheeri ah oo ku saabsan xisaab xirka hay'adda sharaxaad dheeri ahna ka bixinaysa xisaab xirka;

ix) Faahfaahin dheeri ah oo ku saabsan kharashaadka hay'adaha kale ka bixiyaan hay'adda, lacagaha hormariska ah, lacagaha aan wali la isticmaalin, daymaha lagu leeyahay hay'adda, lacagaha jihooyin kale ee dhinacyo aan khasnada dowlada ahayn laga helay, iyo hantida ma guurtada ah ee hay'addu hayso.

Dhamaan foomamka xisaab xirka hadda waxaa laga heli karaa oo hay'ad walba ka dagsan kartaa wabsaytka Wasaaradda Maaliyadda (http://www.mof.gov.so/). Tababar ku saabsan hab adeegsiga foomamka, habraaca xisaab xirka iyo xeerarka caalamiga ah ee kaash ku xisaabtanka ee Cash Basis IPSAS-ka oo la siinayo madaxda hay'adaha dowladda ayuu qabanqaabinayaa Xafiiska Xisaabiyaha Guud.

## 5. Khaladaadkii lagu ogaaday Baaristii XHGD ee laxiriirtay Xisaab-xirkii Sanad Maaliyadeed-yadii hore ee 2019, 2020 iyo 2021, iyo diyaarinta Warbixinada Maaliyadeed ee sanadlaha ah ee dhamaadka sanadka 2022

Sida aad la socotaan, dhowaan ayuu soo gabagabeeyey Xafiiska Hanti dhowrka Guud hawlihii baaritaan ee uu ku sameenayey hay'adaha dowladda ee sanad maaliyadeedkii 2020 Waxaa jirtay khaladaad badan iyo waxyaabo hareer marsan sharciga maamulka maaliyadda dalka oo lagu helay qaar ka mid ah ha'adaha dowladda oo u baahan in la saxo marka la diyaarinayo bayaanada maaliyadeed ee sanadkan 2022 Hadaba si uusan dib danbe u dhicin khaladaadka nuucaas ah, hay'ad kasta ee dowladeed waa in ay raacdaa tilmaamahaan soo socda;

### a) Waa in hay'ad ama Wasaarad kasta soo diyaarisaa xisaab xirka sanad maaliyadeedka 2022

Mid ka mid ah khaladaadka ugu waawayn ee dhacay sanad maaliyadeedyadii la soo dhaafay waxa uu ahaa in qaar ka mid ah hay'adaha ama wasaaradaha dowladdu aysan ku soo gudbin/diyaarin Xisaab-xirka sanad laha ah mudadii loo asteeyey arintaas oo hareer marsan Sharciga Maaliyadeed Dalka. Sidaas darted, Xafiiska Xisaabiyaha Guud waxa uu diyaariyey habraacii iyo foomamkii lagu soo diyaarin lahaa bayaanaadka maliyadeed ee Wasaaradaha, Hay'adaha Dowladda si ay ugu soo diyaariyaan Xisaab xirkooda una soo gudbiyaan xiliga loo asteeyey marka uu dhamaado sanad maaliyadeedka 2022

b) **Caddaymo la'aanta kharashaadka hay'adaha dowladda.**

Warbixinta Hanti dhowraha Guud waxaa lagu sheegay in inta badan ha'yadaha iyo wasaaradaha dowladdu ku guul daraysteen in ay hor keenaan caddaymo ku filan kharashaadka iyo waxyaabihii loo isticmaalay, taas oo ka soo horjeedda sharciyada maamulka maaliyadda dalka. Sidaas darteed waxaa laga doonayaa hay'ad walba in ay qaaddo talaabooyinka soo socda;

- Kharash kasta oo la bixiyo waa in loo helaa caddaymo ku filan;
- Hadii la ogaado in hanti maaliyadeed luntay, Agaasimayaasha Guud ee Wasraaduhu waa in ay hubiyaan in lacagtaas qofkii ay ku maqnayd uu soo celiyey.
- Dhamaan kharashaadka la bixiyey sanad maaliyadeedka 2022, waa in la hubiyaa in ay ku caddahay saxiixa cidda ugu sarraysa hay'adda ee leh amarka bixinta kharashka. Waxa la xiriira iibka agabka iyo adeegga waa in la hubiyaa in ay waafaqsanyihiin hishiisyada lala galo cidda wax laga iibsanayo.
- Dhamaan dokumiintiyada lacag bixinta waa in lagu tiimbareeyaa wax cadaynaya in la bixiyey "sida waa la bixiyey oo kale" ama "PAID"ama "CANCEL hadii la joojiyey bixinta kharashka, si aysan u dhicin in isla dokumintigaas dib loo isticmaalo.

Buugga Hogetusha Habraacyada dowladda ayaa faahfaahin dheeri ah ka bixinaya tirade iyo nuuca caddaymaha looga baahanyahay arrimaha la xiriira kharash bixinta. Eeg qaybta lifaaqa **10**aad ee buugga.

c) **Maamulka Hantida Ma guurtada ah**

Sidoo kale warbixinta Hanti dhowraha Guud waxaa lagu soo qaaday in aysan hay'aduhu lahayn xeerar iyo habraacyo sharci ah oo ay ku dhaqmaan taas oo keenaysa in uu lumo kontoroolka gudaha hay'ada "Internal Controls" ee dhanka hantida iyo qalabka ay hayso hay'adda ama wasaaradda. Hadaba, si arintaas wax looga qabto, Waaxda Hantida Qaranka ee Wasaaradda Maaliyaddu wax ay diyaarisay xeerarka iyo habraacyadii lagu maamuli lahaa Hantida maguurtada ah ee Qarnaka waxa ayna u gudbisay Xeer Ilaaliyaha Qaranka sii uu tifatiro kadibna loo ansixiyo. Sidoo kale Waaxda Hantida Qaranku waxa ay abaabuli doontaa tababar ku saabsan hab maamulka Hantida ma guurtada ah iyo sida

loo itsicmaalayo qaybta hantida ma guurtada ah ee SFMIS-ka. Sidoo kale waxaa laga doonayaa Wasaarad ama hay'ad kastaahi in ay ku soo lifaaqdo warbixinta iyo Xisaab xirka sanadlaha ah shax muujinaysa hantida ma guurtada ah ee ay hayso iyadoo la isticmaalayo shaxda ku lifaaqan wareegtadaan. Eeg lifaaqa (A).

**d) Dabagalka horumarka laga gaaray fulinta taladii Hanti dhowraha Guud ee sanadihii hore ee 2019, 2020 iyo 2021.**

Ka hor inta aysan hay'addu ama wasaaraddu saxiixin bayaanada maaliyadeed ee ka soo baxaya hay'adda, waa in la iska hubiyaa in dhamaan talooyinka Hanti dhowraha Guud ka bixiyey sanad maaliyadeedyada kor ku xusan la dhaqan galiyey. Qayb ka mid ah foomamka warbixinta maaliyadeed ee uu diyaariyey Xafiiska Xisaabiyaha Guud ayaa loogu tala galay in lagula socda horumarka laga gaaray fulinta talooyinka iyo sixista khaladaadka maaliyadeed. Hadaba soo gudbi warbixinta horumarkii laga gaaray fulinta talooyinkii XHGD.

**e) Dakhli la qabtay laguna isticmaalay meeshii lagu aruuriyey (Safaaradaha iyo Shirkadaha Dheef wadaaga ah).**

Warbixinta baarista ee XHGD ee sanad maaliyadeedkii 2021 waxa lagu sheegay in qaar ka mid ah safaaradaha ay aruuriyaan dakhli sidoo kalena ay iskood u isticmaalaan ka hor inta aysan ku soo shubin Khasnada Dhexe ee Dowladda. Sidoo kale iyo Shirkadaha dheef wadaaga ah sida Al-Bayrak iyo Favori aysan ka soo diyaarin Warbixin Maaliyadeed lacagaha ay ka soo xerooda Dekeda Muqdishu iyo Gegida Diyaaradaha ee Aadan Cadde. Arintaaas waxa ay ka so horjeeda dhamaan sharciyada Maaliyadeed ee Dowladda iyo nidaamka ku xisaabtanka lacagta cadaanka ah ee Cash basis IPSAS ee faraya in wadarta guud ee dakhliga iyo kharashkaba lasoo gudbiyo. Sidaas daraaateed waxaa la farayaa dhamaan Agaasimayaasha Guud ee Wasaaradaha gaar ahaan Wasaaradda Arimaha Dibada iyo Wasaaradaha Dekedaha iyo Gaadiidka Cirka iyo Dhulka in ay hubiyaan in aan la qaban dakhliga hadana lagu isticmaalin isla goobtii lagu qabtay ka hor inta aan lagu soo shubin khasnada dhexe ee dowladda ama xisaab bangiyeed uu fasaxay Xisaabiyaha Guud ee Dowladda, iyo in Xisaabiyaha Guud loo soo gudbiyo Warbixin Maaliyadeedka Shirkadaha Dheef Wadaaga ah ee kor ku xusan. Dhamaan dakhliga lagu qabto safaaradaha waa in lagu daro Miisaaniyada Dowladda.

## 6. Hubinta tayada warbixinada maaliyadeed

Agaasimaha/xoghaya guud ayaa mas'uul ka ah soo diyaarinta iyo soo gudbinta warbixin maaliyadeedka hay'adda. Sidaas darteed waxaa laga doonayaa in uu/ay dib u eegis ku sameeyo/samayso tayada warbixinta maaliyadeed ee ka soo baxaysa hay'adda uu mas'uulka ka yahay inta aysan warbixintu soo gaarin xafiisyada Xisaabiyaha Guud iyo Hanti dhowraha Guud ee Dowladda. Si hadaba arrintaas loo xaqiijiyo, shaxda hoose ayaa laga heli karaa qaar ka mid ah talooyin ku aadan halka iyo tabta ugu dhow ee loo xaqiiqsan karo tayada xisaab xirka inta aysan kasoo gudbin xafiiska hay'adda;

| Tirsi. | Meelaha muhiimka ah – Iska hubi meelahan: | Sidee ayay kuu caawin kartaa? |
|---|---|---|
| 1 | **Miisaanka xaqiijinta Isku dheelitirnaanta "Trial Balance"**: Miisaanka Isku-dheelitirnaanta u gaar ah hay'adaha dowladda hada lagama helayo diiwaanka dowladda ee SFMIS-ka balse waxaa laga doonayaa xisaabiyaha hay'adda in uu u diyaariyo hay'adiisa muuqaalka Miisaanka isku dheeli tirnaanta xisaabta ama "Trial Balance" isaga oo adeegsanaya Diiwaanka Guud ee Dhaqdhaqaaqa lacageed ama "General Ledger" iyo diiwaanka lacagaha hormariska iyo waliba iyo isticmaalka miizaaniyadda hay'adda. | Waxa ay kuu sahlaysaa in aad hubsato in xisaab xirka la soo gudbiyey lagu soo kabay cadaymo sax oo oo ay la socdaan Miisaanka Isku-dheelitirnaanta, diiwaanka guud iyo daliil kasta oo loo baahdo. Side lagu heli karaa diiwaanka dhaqdhaqaaqa guud? Waxaad ka soo dagsan kartaa diiwaanka SFMIS-ka isaga oo excel ah si aad ugu adeegsato in aad abuuri kartid Miisaanka Isku-dheelitirnaanta iyo waliba xisaab xirkaaga guudba.<br>**Fiiro gaar ah: waxaad ogaataa in diiwaanka dhaqdhaqaaqa guud "General Ledger-ku" uusan ahayn mid isla eg, sababtuna tahay in ay ka maqanyihiin lacagaha hormariska loo qaaday iyo lacagaha sida tooska ah looga soo wareejiyey khasnada dhexe. Lacagahaas waxaa loo baahanyahay in lagu daro** |

| Tirsi. | Meelaha muhiimka ah – Iska hubi meelahan: | Sidee ayay kuu caawin kartaa? |
|---|---|---|
| | | **Diiwaankaaga Guud ee SFMIS-ka aad ka soo dajinayso si uu iskula kaa ekaado.** |
| 2 | **Xisaabaadka Bangiyeed ee hay'adda "MDA Bank Accounts"**: Miizaanka isla egta waxaa ku dhan dhamaan Xisaabaadka Bangiyada u furan hay'adda. | Waxay tusinaysaa in xisaab xirku dhamaystiranyahay hadii dhamaan xisaabaadka bangiyada uga furan hay'adda warbixintooda lagu soo daro xisaab xirka, hadii kale sax ma aha mana dhamaystirna. |
| 3 | **Bank reconciliations:** Buugaagta diiwaan galinta dhaqdhaqaaqa lacagta waa in ay is lahaadaan dhaqdhaqaaqa iyo haraaga caddaynta bangiga. Arrintaan waxa ay si gaar ah u khusaysaa hay'adaha leh xisaab bangiyeedka loogu wareejiyo lacagaha hormariska loo siiyo. | Waxa ay caddaynaysaa in dhaqdhaqaaqa ku qoran buugaagta hay'adda uu yahay mid sax ah lana socoto caddaynta bangiga laga soo qaaday. Haddi ay dhacdo in ay is waafaqi waayaan labadaan dokuminti farqiga u dhexeeya waa in laga soo gudbiyaa sabab qoraal ah mana la aqbalayo haddii ay is waafaqi waayan.<br>**Fiiro gaar ah: Note: marka la eego sida hadda loo xisaabiyo lacagaha hormariska ah, diiwaanka dhaqdhaqaaqa ama buuga kaashka waxaa u dhigmaya buuga lacagaha hormariska ah ee nambarka SFMIS-kiisu yahay 315103. Haraaga ku jira xisaabtaan waa in uu la ekaado haraaga ku jira Caddaynta Bangiga.** |

| Tirsi. | Meelaha muhiimka ah – Iska hubi meelahan: | Sidee ayay kuu caawin kartaa? |
|---|---|---|
| 4 | **Lacagaha Yaryaroodka ah"Petty Cash"**: Haraaga lacagaha Biririfta ah iyo haraaga ku qoran caddaynta iswaafajinta lacagta biririfta ah ee la socota xisaab xirka qaybtiisa danbe. | Hubso in haraaga lacagaha biririfta ah yihiin kuwo saxan lana eg lacagta caddaanka ah eek u jirta khasnada hay'adda. Sidoo kale hubsi in aysan lacagta birirfta ahi ka badanayn wadarteedu US$ 2,000 (eeg qaybta 7.3.17aad ee buuga hogetusaha habraacyada ee COPM). |
| 5 | Tirooyinka isku dhigma: markii aad eegto foomamka xisaab celinta waxa aad arkaysaa laba sano oo is barbar taala oo loogu tala galay in la isku barbardhigo, hadaba maadaama sanadkani yahay midka ugu horeeya nuuciisa ma jirto sanad kale oo loo barbardhigi karo sanadkaan 2021. | Nidaamka ku xisaabtanka lacagta caddaanka ah waxa uu farayaa in la soo gudbiyo isbarbardhiga xisaabaadka ee sanadkii hore. |
| 6 | **Lacagaha Hormariska ah iyo Bixinta Tooska ah:** wixii ka yimaada khasnada dhexe waxaa si fudud looga hubsan karaa diiwaanka SFMIS-ka. | Waxaad hubisaa in lacagaha tooska ah iyo kuwa hormariska loo bixiyo in si muuqata loogu soo daray muuqaalka dakhliga iyo kharashaadka iyo waliba muuqaalka isbarbardhiga miizaaniyadda iyo lacagta dhabta loo helay. |
| 7 | **Xisaabta lacagaha lagu leeyahay hay'adda (oo ay ka midka tahay daymaha kharashaadka) iyo lacagaha hay'ada lagu leeyahay oo aysan wali soo xisaab celin.**<br>Faahfaahinta lacagahaan waxaa si shax iyo qoraal ah loogu soo darayaa xisaab xirka | Hubi in ay dhamaystiranyihiin tirada guud ee daymaha lagu leeyahay iyo mida dowladdu ku leedahay hay'adda |
| 8 | Xisaab xirka hay'ada waxaa lagu soo qori karaa kaliya foomka uu Xafiiska Xisaabiyaha Guud soo | Tani waxa ay adkaynaysaa in xisaab xirka hay'adda loo soo |

| Tirsi. | Meelaha muhiimka ah – Iska hubi meelahan: | Sidee ayay kuu caawin kartaa? |
|---|---|---|
| | gudbiyey. Faahfaahinada muhiimka ahna waa in si furfuran loogu soo qoraa foomka xisaab xirka qaybta looga asteeyey si loo fahmo waxa ay u taaganyihiin lambarada ku qoran xisaab xirka asalka ah.<br>*Fadlan hadii aad u baahato caawin farsamo la xiriir waaxda Xisaabaadka Dowladda iyo Warbixinada Maaliyadeed ee xafiiska Xisaabiyaha Guud.*<br>. | diyaariyey qaab waafaqsan xeerarka aynu qaadanay ee cash-basis IPSAS iyo talooyinka uu soo saaray X/Xisaabiyaha Guud. Sidoo kale waxa ay noo hubinaysaa in tirade iyo faahfaahinadu is leeyihiin. |
| 9 | **Warbixinta Isticmaalka miisaaniyadda**:<br>Warbixintaan waa in ay tahay mid sax ah. | Lacagta ku qoran Muuqaalka is-barbar-dhigga miizaaniyada iyo qoondada dhabta ah ee la isticmaalay, waa in ay ka muuqdaan dhamaan kharashaadka iyo ilaha dakhliga ilaha kala duwan ee hay'adda. |
| 10 | **Hantida ma guurtada ah:**<br>Hay'addu waa in ay leedahay diiwaan lagu qoro dhamaan hantida ma guurtada ah ee ay hayso, mar kasta oo wax ka badal lagu sameeyo hantidaas waa in la hubiyaa in diiwaankana lagu caddeeyey wax ka badalkaas. Qalab kasta oo hay'adda yaala waa in uu tiro kooban yahay leeyahayna tirsi u gaar ah mid kasta. | Waxa ay noo hubinaysaa in hantida taala hay'adda ay tiro koobantahay. Hay'ad kastaahi waa in ay hubisaa in hadii;<br>• Qalab cusub la soo iibiyo inta lagu guda jiro sanad maaliyadeedka in la is waafajiyo lacagta ku qoran diiwaanka hantida ma guurtada ah ee hay'adda iyo Diiwaanka Guud ee dhaqdhaqaaqa "GL-ka"<br>• Calaamada aqoonsi ee la siiyey qalab kasta waa in la hubiyaa in meel qarsan looga dhajiyey oo uusan si |

| Tirsi. | Meelaha muhiimka ah – Iska hubi meelahan: | Sidee ayay kuu caawin kartaa? |
|---|---|---|
| | | sahlan uga fuqaynin<br>• Tirokoob waa in lagu sameeyaa ugu yaraan sanadkiiba mar.<br>• Waa in la helaa caddayn lagu qanci karo oo muujinaysa in qalabka ama hantida ma guurtada ah ee u diiwaan gashan in hay'adu leedahay.<br>• Si joogto ah waa in qalabka/hantida ma guurtada ah loo dayac tiraa. |
| 11 | Xisaab xirka waa in waqtigiisa lagu diyaariyaa si Agaasimaha Guud ee Wasaaradda/hay'adu u helo waqti ku filan oo uu dib u eegis ugu samayn karo ka hor inta aan loo soo gudbin xafiisyada Xisaabiyaha Guud, iyo Hanti dhowraha Guud ee Dowladda. | Waxa ay hubinaysaa in aan la dhaafin waqtiga ugu danbaysta ah ee la soo gudbinayo xisaab xirka lana muujiyo in xisaab xirku yahay midka saxda ah ee hay'adda. |

**7. Arrimo kale oo ay muhiim tahay in la shaaciyo.**

Sida laga dheehan karo foomamka xisaab xirka, waxaa muhiim ah in hay'adaha dowladdu ay si buuxda u diiwaan galiyaan una shaaciyaan macluumaadkan soo socda

- Lacagaha sida tooska ah loo siiyo shirkadaha agabka ama adeegga siiya hay'adda oo ay bixiyaan hay'adaha aan dowladda ahayn ;
- Agab ama adeeg laga helay jihooyin kale ee aan dowladda ahayn;
- Dakhli aan ku jirin miizaaniyadda dowladda ee la siiyay hay'adda, markii laga reebo mashaariicda hoos timaada hay'adaha ee iyagu leh xisaab xir u gooni ah.

## 8. Xisaab xirka Mashaariicda

Dhamaan mashaariicda ku jira miisaaniyadda dalka ama aan ku jirin miisaaniyadda (Off-budget) waxaa la farayaa in ay u soo gudbiyaan Xafiiska Xisaabiyaha Guud xisaab xir rubacle ah iyo mid sanad le ah si waafaqsan shaxda 1aad ee wareegtadaan. Foom u gaar ah xisaab xirka mashaariicda waxaa laga heli karaa website ka Wasaaradda Maaliyadda (http://www.mof.gov.so/). Xisaab xirka mashaariicda waxaa laga doonayaa in uu lahaado ogolaanshaha iyo saxiixa madaxa hay'adda ama wasaaradda uu mashruuco hoos yimaado iyo isku xiraha mashruuca.

Madaxda wasaaradaha iyo hay'adaha dowladda waxaa laga doonayaa in ay la socdaan mashaariicda aan ku jirin miizaaniyadda dalka ee ka hawl gala wasaaradda ama hay'adda dowladeed in ay diyaariyaan xisaab xir ku aadan hawlaha ay ka wadaan wasaaradda hubiyaana in xisaab xirka loo soo gudbiyo Xafiiska Xisaabiyaha Guud.

## 9. Taageerada Farsamo ee uu Xafiiska Xisaabiyaha Guud siinayo Hay'adaha Dowladda.

Xafiiska Xisaabiyaha Guud ee Dowladda waxa uu ula diyaar yahay dhamaan hay'adaha dowladda taageerada farsamo ee ay u baahnaan karaan inta ay diyaarinayaan ama soo gudbinayaan xisaab xirka iyo warbixinada maaliyadeed ee laga doonayo. Sidaas oo kale, waxaan ka sixi doonaa hay'adaha dowladda talooyinka uu soo jeediyo Hanti-dhowraha Guud ee la xiriira hareer marka shuruucda maaliyadeed ee dalka. Sidaas darteed, haddii aad u baahataan wax caawinaad ah shaxda hoose ayaa ka heli kartaan ciwaanada iyo magacyada caawiyeyaal idiin diyaar ah;

| Tirsi. | Magaca | Email | |
|---|---|---|---|
| 1. | Fatumo Osmaan. Farah Xisaabiyaha Guud<br><br>Abdirisak Mohamed (Ku.xigeenka | axsan08@gmail.com | |

| Tir si. | Magaca | Email | |
|---|---|---|---|
| | Xisaabiyaha Guud) | | |
| 2. | Abdirahman Mohamed Hassan (Agaasimaha waaxda Xisaabaadka dowladda iyo warbixinada) | mohashanle@gmail.com | 0615917698 |
| 3. | Adam (Agaasimaha Waaxda SFMIS-ka) | aadancade15@gmail.com | 0615861070 |
| 4. | Qabashada codsiyada caawinaada | reporting.oag@gmail.com | 0618156666/0615681394/ 0615934310/0617443103/ 0614841554/0615577533 |

Waxaan rajeynayaa inaan joogtayno iskaashiga dhexdeena ah maadaama aan si wada jir ah ugu wada shaqaynayno sidii aan u hormarin lahayn hannaanka dib-u-habeynta maaliyadda dalka ee 'PFM' oo ay Dowladda Federaalka Soomaaliy ku dhaqaaqday.

**Fatuma Osman Farah**

**Xisaabiyaha Guud ee Dowladda**

---------------------------------------------------

**Og:**
Dr. Cilmi Maxamuud Nuur
Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda
Dowladda Federaalka Soomaaliya

Raaxo Maxmuud Janaqoow
Wasiiru dowlaha

Wasaaradda Maaliyadda
Dowladda Federaalka Soomaaliya

Cabdiqafaar Cilmi Xaange
Wasiir ku xigeen
Wasaaradda Maaliyadda
Dowladda Federaalka Soomaaliya

Saleebaan Cumar
Agaasime Guud
Wasaaradda Maaliyadda
Dowladda Federaalka Soomaaliya

Maxamed Maxamuud Cali
Hanti-dhowraha Guud
Dowladda Federaalka Soomaaliya

## Lifaaq A – Foomka la socoshada Hantida ma guurtada ah ee Dowladda

| Nuuca Hantida ma guurtada ah<br><br>(Raac sida ay ugu diiwaan gashan yiihiin SFMIS-ka) | Qiimihii lagu soo gaday ee bilowga sanadka<br><br>(US$)<br><br>2021 | Wixii lagu soo kordhiyey<br><br>(US$) | Wiii la iska iibiyey<br><br>(US$) | Qiimaha Hantida maguurtada ah ee Dhamaadka sanadka<br><br>(US$)<br><br>2022 |
|---|---|---|---|---|
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |

| Nuuca Hantida ma guurtada ah<br><br>(Raac sida ay ugu diiwaan gashan yiihiin SFMIS-ka) | Qiimihii lagu soo gaday ee bilowga sanadka<br><br>(US$)<br><br>2021 | Wixii lagu soo kordhiyey<br><br>(US$) | Wiii la iska iibiyey<br><br>(US$) | Qiimaha Hantida maguurtada ah ee Dhamaadka sanadka<br><br>(US$)<br><br>2022 |
|---|---|---|---|---|
| **Total** | | | | |